

Baakinka

Xeerarka baakinka

Waxaa jira xeerar ku saabsan meeshaad istaagi kartid ama aad dhigan kartid gaariga Banyule gudaheeda oo loo baahan yahay inaad raacdo. Haddii aadan raacin xeerarkan waxaa laga yaabaa in lagu ganaaxo.

Qaar ka mid ah xeerarka guud waa sidan:

Xadadka wakhtiga baakinka

Calaamadaha baakinka waxay kuu sheegayaan ilaa intaad dhigan karto gaarigaaga goob cayiman. Waa inaad dhigan gaarigaaga wakhti ka badan wakhtiga ay calaamadu ku tuseyso.

Gaari dhigashada meelaha cawska lagu beeray ee wadada dhinaceeda

Meelaha cawska lagu beeray ee wada dhinacyadeeda waa inaad dhigin gaarigaaga meesha cawska lagu beeray.

Calaamadaha lama dhigan karo

Meeshii leh calaamada 'Lama Dhigan karo', waa inaad gaarigaaga joojin sababkasta ha ahaatee, xitaa haddii aad joogeysid gaarigaaga dhexdiisa ama aad ka tagto isagoo shidan.

Soonanka Rarista iyo Dejinta

Soonanka rarista iyo dejinta waxaa isticmaala gaawaarida ganacsiga inay alaab keenaan ama ka qaadan oo ah qayb ka mid ah shaqadooda. Waa inaad dhigan gaarigaaga 'Soonka Rarista iyo Dejinta' in lagaa siiyo VicRoads ogolaansho mooyaane.

Baakinka curyaamiinta

Meelaha baakinka ee dadka qaba iinta waxaa lagu muujiyaa calaamad gaari curyaameed. Meelaha baakinka curyaamiintu waxaa isticmaali karaa oo keliya dadka leh iinta oo leh ogolaansho la yiraahdo Dabaqada 1 ee Ogolaanshaha. Ogolaansha baakinta dadka iinta lehi waa bilaash. Haddii aad iin leedahay oo aad u baahan tahay ogolaansho, wac Golaha.

Tuumbada Dabdemiska

Tuumbada biyaha dabka lagu damiyo waxay ku taal Banyule dhinacyadeeda oo dhan si ay u siiso isticmaal degdeg ah biyaha si dabka loo damiyo. Tuumbada waxay badanaa ku taal meesha cawsku ka baxo waxaana laga yaabaa inay tahay mid qalin ah oo xagga kore ka cas ama dabool wareegsan oo madow oo dhulka ku yaal. Waa inaad ilaa hal mitir wax u jira gaariga dhigan.

Baakinka

Gaari dhigashada guryaha meelaha laga galo ama marshabiyeedka

Waa inaadan gaariga dhigan meesha guriga laga galo wax ka mid ah ama meesha rakaabku maro. Sidoo kale waa gef dambi ah in gaariga la dhigto qayb kasta oo ka mid ah marshobiyeediga.

Gaari iibinta

Waa inaadan dhigin gaarigaaga wadada, meesha cawska lagu beeray ama meel kale oo dadweynuhu leeyahay si aad ugu xeysiiso iib. Haddii aad sidaa sameyso waxaa laga yaabaa in lagu ganaaxo.

Dayactirka gawaarida

Waa inaadan ku dayactirin gawaarida wadada, meesha cawsku ka baxo ama meelaha kale ee dadweynaha ama waxaa laga yaabaa in lagu ganaaxo.

Gaawirada aan diiwaangashaneyn

Gawaarida jaba ama aan ka diiwaangashaneyn VicRoads waa inaan lagaga tegin ama la dhigin meel dadweynuhu leeyahay. Golaha ayaa laga yaabaa inuu qaado gaarigaaga waxaana laga yaabaa inaad lacag bixiso si aad dib ugu soo ceshato waxaana laga yaabaa in lagu ganaaxo.

Haddii aad jeclaan lahayn macluumaad dheeraad ah oo aad u baahan tahay caawimaada turjubaan fadlan la xiriiir TIS National 131 450 weydiina in lagula xirriiriyo Golaha Banyule 9490 4222.

Haddii kale waxaad la xirriiri kartaa Golaha Banyule adoo soo wacaya kooxda Adeega Macaamiisha 9490 4222, booqanaya mid ka mid ah Xarumaha Adeegayaga ee Ivanhoe ama Rosanna ama iimeyl noo soo diraya enquiries@banyule.vic.gov.au